aan U Xareeyaa Dacwada Dambiilaha

1. Marka a doonaysid inaad xatraysid ka cabashada ama dacwada dambiilaha, waa inaad ahaataa 18 jir ama aad ka waaynaataa.
Hadii ay da'daadu ka yartahay 18 jir, wac xafiiska dhex-dhexaadinta muranka iyo dooda (502) 595-3106
2.Tag xafiiska dhex-dhexaadinta muranka iyo dooda ee Hoyga Cadaalada. Xafiiskani wuu furan yahay 24ka-saacadoodba, todobada maalmood ee wiiga.
Soo qaado aqoonsi uu sawirkaagu ku yaalo, waxa kale oo aad soo qaadataa qofka aad ashkataynayso magaciisa iyo ciwaanka gurigiisa. Soo habayso dadka markhaatiyada kuu ah magacyadooda iyo cinwaanadooda inta aanad xafiiskan imanin.
3. Qof ka socda xafiiska dhex-dhexaadinta doodaha ayaa kaa caawin doona sidaad u xarayn lahay dacwadan.
4. Qaadi ayaa hubinaya dacwadaaada ka dibna wuxuu yeelayaa mid ka mid ah go'aamada hoos ku qoran:

- Wuxuu dacwada u gudbin doonaa qof dhex-dhexaadiye ah. Waxaad heli doontaa warqad odhanaysa dacwad dhagaysi ayaa dhici doona mudo 7-10 maalmood gudahood ah. Hadii dhex-dhexaadiyaha aad ku qanci waydo waxaad qaadiga waydiisan kartaa inuu dacwadaada ku noqdo oo dib u eego.
- Wuxuu ku amri karaa ama uu soo saari karaa ammar in dambiiluhu maxkamada tago. Waxa weeye amr ogaysiis ah oo la ogysiinayo in dambiiluhu maxkamada iska soo xaadiriyo.
- Wuxuu ammar ku bixin karaa in dambiilaha la soo xidho. Dambiilaha waa laxidhayaa waxaana la gaynayaa jeel, ka dibna waxaa la keenayaa maxkamada.
- Wuxuu diiddi karaa qaadigu dacwadaada,. Hadii qaadigu diido dacwadaada, waxaad helidoontaa warqad mudo 7-10 maalmood gudahood ah. Boostada ayaa warqad laguugu soo diri doonaa hadii ,maxkamada lagaaga baahdo.

Hadii qofka dambiilaha ah la xidho ama lagu amro inuu maxkamada tago, warqad ayaa boostada laguugu soo dirayaa, warqadaas oo ku sheegaysa goorta aad maxkamada tagaysid.
Qareen Looma Baahna.
Hadii aad u baahantahay macluumaad dheeraad ah, wac xafiiska qareenka gobolka (502) 574-6336

Hay'ada U Adeega Bini Aadmiga Ee Louisville Iyo Agagaarkeeda kuma takoorto kamana cunsuriyadaso shaqadaama taageerada sababahala xidhiidha curyaannimo, rag iyo dumar, midab, sinjiyad,diin, da', meesha uu qofku u dhashay awgeed,ama lab iyo dhedig ka qofku yahay.

Jerry E. Abraha
Duqa magaalada

Gudida Louisville iyo Agagaarkeeda

Xafiiska Cadaadinta Xaaska…….581-7222
Karaaniga E.P.O……....595-4697
Xafiiska Awood Siinta Dhex-dhexaadinta Muranka....595-3106
Qareenka Degmada……..……..574-6336
Qareenka Barwaaqo Sooranka…….……595-2340
Qaybta Louisville Iyo Agagaarkeeda……..…...574-2111
Booliiska Louisville Iyo Agagaarkeeda Qaybta Magaalada..574-7111
Sheerifka Degmada Jefferson…….……574-5400
Adeega Illaalinta Dadka Waawayn (24-saac)…….…..595-4803
Adeega Ilaalinta Caruurta (14-saac)……..595-4550
Damaanda Iyo Ishaafalataynta……...……595-4035
Sharci Caawinta Bulshada…….....584-1254
Qalalaasaha iyo Macluumaadka……..…589-4313
Golaha Dumarka Iyo Qoysaska –Mashruuca Cadaadiska Guriga..581-7222
Golaha Dhexe Ee Qaadashada-600 W. Jefferson..…595-0855
(Xafiisyada Kale Ee 700 W. Jefferson)……..595-4697

Xafiis kasta oo LMPD ahi wuxuu leeyahy baadhayaal ama dad u u gaar ah ka shaqaynta wax ka qabadka kadeedka guriga



Sidee Baa Wax Looga Qaban Karaa Cadaadiska

Golaha dowlada ee reer magaalka
810 Barret Avenue, Qolka 231
Louisville, KY 40204
(502) 574-5360
(502) 574-6888 Fax
E-mail: ofw@louisvilleky.gov
Tina Lentz, Agaasime

Amar Madani ah oo la yidhaahdo (EPO) ayaad xarayn kartaa. Waa amar qaadigu bixiyo, kuna amrayo qofka cadaadiska wadaa inuu joojiyo. Waxa kale oo aad xarayn kartaa waxa loo yaqaan ka ashkato dambiile. Talaabadani waxay sababi kartaa in amar lagu siiyo dambiilaha in la xidho ka dibna lagu soo oogo dambiga uu gaystay. EPO iyo Ashkatada Dambiilaha labadaba waa d xarayn kartaa.

Hadii aad doonaysid inaad xaraysid dacwada Illalinta deg-dega ah, waa inaad:
inaad ahaataa:
1. Qof reerka ka mida. Xaaskii/ninkii hore ama labada qof ee aan is qabin laakiin wada nool mid ka mid ah, ama labada qof ee hore u wada noolaa ee caruuri ka dhaxayso.
2. Waa inaad ahaataa18 jir ama ka wayn.
3. Inaad wadato qofka dambiilaha ah cinwaankiisa guriga,
4. Hadii ay suurta gal tahay qofka dhalashadiisa iyo sooshal sekuuritigiisa. **Ujeedada OFW**

Ujeedada OFW waa inay ka wax ka qabtaa waxyaabaha sharcuga ah ee khuseeya arimaha dumarka.
Xafiiska Ololaynta Arimaha Dumarka.
Xarunta Ururada Dumarka
Xarunta Macluumaadka Bulshada
Xaidhiidh ka Bulshada
iyo Dowlada Goboleedka
Xubinta Wada Shaqaynta Ururada Bulshada
Ee Ku Hawlan Arimaha Dumarka.
Ololaynta Wada Hadalada.
Sugidda iyo Iswaydaarsiga nabada
iyo Booqashooyinka Xarumaha.

Sidee Baan U Heli Karaa Ilaalinta Deg-Dega Ah

1) Tag golaha cadaalada. Hadiiaad tagtid saacadaha 7:30 Subaxnimo Ilaa 3:30 Galabnimo wiiga dhexdiisa, tag Xafiiska Karaaniga Maxkamada Qoysaska. Wakhti kasta oo kale tag miiska Maxkamada Gobolka qaybta dambiyada iyo wada mariska ama taraafikada. Waxa ku yaala miis aad ka heli kartid macluumaad hadii aad u baahantahay qof ku caawiya EPO waad qaadan kartaa 24-saac, todobada maalmood e wiigaba..
2) U sheeg Karaaniga inaad u baahantahay Ammarka Ilaalada Deg-dega ah.

Sidee EPO Ii Ilaalin Kartaa

Ammarka Ilaalinta Deg-dega ah Ee EPO waxay kuu ogolaan kartaa Dhamaan waxyaabaha hoos ku qoran ama waxba:

1. Ammar in dambiiluhu joojiyo inuu dib kuugu hanjabao.
2. Ammara in dambiiluhu aanu iibin Karin ama burburin hantida iyo alaabta guriga taala.
3. Ammara in dambiiluhu guriga ka baxo (hadii aad wada nooshihiin).
4. Ammar in dambiilahau wax xidhiidh ah kula yeelan Karin.
5. Ammar in dambiiluha mudo gaaban aan caruurta loo ogolaan

Waxa lagu waydiin doonaa inaad saxeexdo (EPO), waayo waxa weeye qoralka cadaynta ah ee qaadiga la hor keenay. Qoraalkaasi wuxuu qeexayaa dacwadaada, markaa aad bay muhiim u tahay inaad runta ka sheegtaa. Mar walba ku dadaal inaad akhrido waraaqaha intaanad saxeexin.Dhagaysi ayaa la qaban doonaa mudo 14 maalmood gudahood ah.

Maxaa Dhacaya Marka Dacwada La Dhagaysanayo

Maalinta dacwada la dhagaysanayaa waxay ku qoran tahay EPO gaga. Aad bay muhiim u tahay inaad tagto dacwad dhaggaysiga. Hadii aad tagi waydo, APO gaagu uma shaqaynayo dib dambe. Marka dacwad dhagaysigu dhacayo waa inaad xaqiijisaa inay run tahay dacwadaadu. Hadii aad markhaatiyo haysato waa inaad keentaa markhaatiyadaas. Hadii dhaawac ku gaadhay ama nabaro kugu yaalaan, waa inaad keentaa sawiradii lagaa qaaday ee muujinayay dhaawacaas. Hadii aanad sawiro haynin, keen dadkii ku ogaa markay nabaradu kugu yaaleen ama kaa muuqdeen. Hadii aad yagtay dhakhtar, dhaawacyo ku gaadhay awgood, keen maxkamada wixii dhakhtarku kaa qora.
Hadii uu qaadigu rumaysto in kadeed guri dhacay, waxa lagu siinayaa ilaalo ammar sheegaya in lagaa badbaadiyo Kadeedka Guriga oo la yidhaahdo (DVO) Ilaalintan ama badbaadintani waxay kuu soconaysaa mudo sanad ah Badbaadintani waxay ku siinaysa Ilaalin la mid ah ta EPOga. Waxa kale oo aad Qaadoiga waydiisan kartaa in dambiilaha lagu xukumo inuu caruurtiisa so biiliyo lalana taliyo ama labadiinaba la idinla taliyo.
DVO waxa kale oo ay wadan kartaa sharciyo kaa ilaalinaya inuu qofku mar kale kugu xadgudbo. Hadii ay jirto waxyaabo kale oo aad is leedahay waxay kaa badbaadinayaan ina xad gudubkani soo noqdo, u sheeg qaadiga.

Maxaa Dhacaya Maka Dacwada La dhagaysto Ka

Marka lagu siiyo EPO ama DVO, waa inaad mar walba sidataa warqada. Sidoo kale waa inay caruurtaadu haystaan kuligood. Hadii dambiilhu uu ku xad gudbo amarka, wac booliiska si deg-deg ah. Waa inaad u sheegtaa booliiska inaad haysato EPO ama DVO.

Looma baahna Qareen ama inaad bixiso lacag si aad u hesho Ilaalintan.